# GOLAHA WAKIILADA JSL

## WAAXDA HADAL-QORAALKA IYO GUDIYADA

**Kal-fadhigii 36aad fadhigii 5aad**

**10/03/2018**

**Ajendaha: -**Dooda Ajandaha Kal-fadhiga 36aad

**Quraanka: -** Md. Xaamud

**Gudoominayay: -** Md. Baashe M. Faarax

**Md. Aadan X. Diiriye Dirir: -** shir gudoonka, saxaafada iyo marti sharaftaba salaanta islaanka ayaan idinku salaamayaa Gudoomiye anigu waxaan odhan lahaa waa in ay ajandeheena ka mid ahaataa maalin ka hadlaysa wadciga la taagan yahay oo umada aynu ma talayno gaar u ah, waxanan soo jeedin lahaa inta aanan u gudbin ajandaha in sarifkan samada inala qabtay oo shaqaalaha iyo dadkan hantida yar ee aan waxba haynin sidii aan isku waafajin lahayn, hadii ay noqon lahayd in aan talo iyo sharciba ka bixin karno ka bixino, sida badbaadada Cuntada in aynu qodobka labaad ka dhigano. Oo labaduba ay bulshada saamayn ku leeyihiin.

Ajandaha sidiisa kale sidan ay u kala horeeyaan ayuunbaan u dhigi lahaa laakiin labadaa qodob ee uu midna la xidhiidho maaraynta sarifka midna uu la xidhiidho ilaalinta tayada cunta (food security) waad salamaantihiin.

Gudoomiye farqada todobaad ee ajandeheena ee ka hadlaysa xeerka shaqaalaha Baarlamaanka iyada oo ah qodob distooriya sheegayana xeerka shaqaalahu in uu ku soo boxo Xeer hoosaadka golaha wakiilada halkaa dib ha loogu noqdo.

**Md. Abdikariim Aw Cali shabeel: -**Mudane Gudoomiye waxaad moodaa ajanandayaasha Golaha lakeenaa in aan laga bilaabin halkii aan ajandihii hore kaga tagnay, oo hadana mid cusub la keeno. Ana waxaan qabaa in halkii uu ajandihii hore taagnaa laga sii qaado.

Sidoo kale waxaan xildhibaankii iga horeeyay la qabaa in arimaha xaasaasiga aha iyo xeerarka u baahan in la dadajiyo iyo in lagu soo daro ajandaha wadciga iyo duruufaha taagan. Sidoo kale waxaan waafaqsanahay sida uu ajandahani u qoran yahay wanan idin salaamayaa intaa ayaan kaga baxayaa.

**Md. Cali Maxamed Adan (Cali-bare)** xildhibaanada, shirgudoonka iyo shaqaalaba waan salaamayaa waxanan ku salaamayaa salaanta islaamka. Waxaanan ugu horaysiin lahaa oo aan ajandaha ku soo dari lahaa Xeer-hoosaadkii Golaha si shaqada goluhu u hagaagto oo waliba laga dhigo qodobka ugu horeeya ayaan soo jeedin lahaa.

Golahani xeer-hoosaad malaha waxa hortaagana anigu ma garanayo, markaa qodobkaa waan soo jeedinayaa.

Qodobka labaad waxaa weeyi Xeerarka hore loo ansixiyay oo inaga iyo Baarlamaanadii inaga horeeyay ansixiyeen ee dhaqan galay laguna shaqeeyay marka wax laga badalayo waa in ajandaha lagu cadeeyaa xeerkaasu waa kii dhaqan galay wakhtigaa iyo wakhtiga waxna laga bedelayo, Tusaale ahaan ka soo qaad Saxaafadu waxay leedahay Xeer dhaqan galay oo lagu shaqeeyay, ajandayaasha waxaa ku soo noqnoqonayay Xeerka Saxaafadda, markaa xeerkan saxaafadu ma mid cusubaa ma mid waxlaga la bedelayaa waa in la cadeeyaa tusaale ayaan kaa u soo qaatee way badanyihiin xeerarka noocaas ahi.

Markaad Ajandaha noo samaynaysaan shirgudoon ahaan waa in xeerku hadii uu yahay xeer hore oo jiray Somaliland baalamaankeedu ansixiyeen waan in lagu cadeeyaa ma xeer cusubaa mise waa wax ka bedel. Sidee ayay u dhacay saa isaga oo xeer jiray in xeer cusub la sameeyo? Qaynuun ahaan waa in xeerkii hore wax-ka bedel waa in lagu sameeyaa oo uu ajandaha uga muuqdaa xeerkii caynkaa iyo caynkaa oo wax ka bedel lagu samaynayo.

Waxaa kale oo jira in Golahan ay ka bexeen dhawr xeer oo iska soo hor jeeda oo xaga maxkamadaha lagu wareeray sida xeerarka maaliyada, markaa waxaan soo jeedinayaa in xeerarkaa PFM-ka Ajandaha lagu soo daro si dib loogu saxo.

Tusaale ahaan mid kamid aha ayaa waxaa uu sheegayaa in gudida dabagalka iyo hantida qaranka ee golahani Hanti-dhawrka Guud u ansixinayaan miisaaniyadiisa taasi oo ka soo hor jeeda DASTUURKA QARANKA xeerkaas oo golahan ka baxay isaga oo DASTUURKU WUXUU LEEYAHAY WIXII MIISAANIYAD IYO WIXII KHARASH LA GALAYO GOLAHAN AYAA ANSIXINAYA, goormaa gudi golahan ka tirsani awooda yeelatay in fulinta ay u ansixiso miisaaniyad? Waxaanan qabaa in xeerarkaa hada Ajandaha lagu daro waayo miisaaniyadii ayaa soo socota hana loogu horaysiiyo labadaa arimood waa in aan saxnaa.

**Md. Cumar Axmed Saleebaan (Sanweyne):-** Gudoomiye anigu marka hore waxaan taageersanahay xildhibaankii iga horeeyay ee arinka fayo dhawrka ka hadlay,

maadaamo oo aynu umada masuul ka nahay waa in umada welfare keeda ka war haynaa hadii ay tahay daawo iyo cuntooyinba wixii aynu ka qaban karnaba waa in aan ka qabanaa waana masuuliyad ina saaran weeyaan, waayo hadii ay tahay shidaal, cunto, Daawo iyo Gawaadhi stander hoosee dunida dadka ugu hooseeya ayanu ka sii hoosaynaa oo inta badan waxa wadanka la keenaa waa fake, markaa in arintaa si deg-deg ah xeer loogu sameeyo oo miisaaniyad loo qoondeeyo dawooyinkaa. Waxaan anigu hayaa nin dhakhtar ah oo dhakhaatiirta wadanka ka hawl gala oo 22,250 qaliin sameeyay oo meel-walba oo jidhka ka mid ah meel aanu qalini jirin, oo isagu ku soo qoray baraha Bulsha in uu sameeyay 22,250 qaliin, sawiradiina waanu haynaa, waa in aan taa fayo dhawrka qodobka koobaad aan ka dhignaa sidii aan sharci ugu samayn lahayn umadana u ilaalin lahayn.

Qodobka labaad Gudoomiyo waxaa yiilay soo jedin ah dawladaha hoose oo aynu fadhigii hore ku xidhnay inaga oo aynaan ka hawl galin lataliyaha sharcigana loo dirin arintaasina waa arin muhiim ah, waayo gudi dhaqaale ahaan markii aanu kormeerka soo samaynaynay waxaanu soo aragnay waxyaabo badan oo laga naxo ayaanu ku soo aragnay magaalooyinka Somaliland. Markaa waana sharci hadii mooshin la soo jeediyo in uu ugu horeeyo had iyo jeer hawsha la qabanayo waana in uu sidiisii u socdaa uu dhigayay xeer-hoosaadku waad mahadsantihiin.

**Md. Maxamed Saalax Cige: -** Shir-gudoonka, saxaafada iyo Mudanayaashaba waan salaamayaa, marka labaadna waan u mahad celinayaa shirgudoonka, ajandaha kal-fadhiga 36aad ee maanta runtii ay doodoosu soconayso. Waxaan doonayaa marka hore in aan kalmad ka idhaahdo had iyo goor shuruucdu sadex akhris ayay martaa: -

- akhriska hore Gudidda ayay ka timaadaa oo ay ka soo baxdaa
- Akhriska labaadna Gole weynaha ayuu yimaadaa
- Akhriska sadexaadna waa ka aynu ku ansixino

Markaa sida hada ajandaha ka muuqata marka laga yimaado labada xeer ee ugu horeeya xeerka maaraynta Qashinka iyo xeerka qandaraasyada mooyee inta kale waa xeerar ku maqan gudidii oo aanay wali golaha keenin, markaa waxay halkaasi u naahan tahay in dib loogu noqdo oo wixii akhriska u baahan ee gole weynaha u yaala in ajandaha lagu soo daro oo ay doodu markaa run ahaantii halkaa ka bilaabanto, sida ajandaha ku qorana farqadiisa 3aad ilaa ta 13aad dhamaantood waa akhriskii 1aad markaa waxaan odhan lahaa arinkaa shirgudoonku ha eegaan.

Midna mudanayaasha iga horeeyay ayaan la qabaa runtii oo xeerarka marka aynu inagu ansixino ee uu Guurtida inoo dhaafo madaxweynuhuna uu saxeexo xeer dhamaystiran

ayuu noqdaa, marka uu inaga dib inoogu soo noqdana waa amendment, markaa halkan waxaa ku jira sida mudanayaashuba sheegeen in uu noqdo AMENDMENT ama wax ka bedel iyo kaabis. Tusaale ahaan xeerka saxaafada iyo xeerka doorashada golaha wakiilada oo ah ka aynu hada ku fadhino oo u baahnaa laba qodob uun in lagu sameeyo wax ka bedel iyo kaabis.

Markaa waa in lagu qoraa wax ka-bedel iyo kaabis sidaana gudidda arimaha guduhu xilkaa kula wareegto ayaan ku talin lahaa, lakiin marka uu sidan u qoran yahay waxaa uu qof walba u qaadanayaa in uu yahay xeer cusub oo doorasho gole wakiilo

Waxaa kale oo aan taageerayaa ta fayo dhawrka oo aad iyo aad u mihiim ah xeerarka halkan ku jira oo dhan wuu ka mihiimsanyahay wanan ku darayaa, waxaa kale oo aan ku darayaa xeer kale oo dadka iyo bulshaduba aad ugu baahan tahay ayaan dari lahaa oo marwalba lagu daro oo aan hadana ka muuqan waana XEERKA CIQAABTA GUUD, xeerkaa oo xeerar badan oo aynu soo saarnay wax ka bedeleen una baahan in wax laga badalo. Oo ajandaha lagu soo daro ayaan soo jeedin lahaa.

Waxaa kale oo aan soo jeedin lahaa in xeerarkii aan ansixinayna laga daba tago oo qaar ka mid ah ayay ilaa hada suuragali kari ladahay in la dhaqan galiyo oo xeerkii oo yaala ayaa hadana xeer kale lagu dhaqmaa. Markaa laga dabatago waa awooda Golaha Wakiilada waa in gudiyada loo xil saaraa bal xeerarkii ay soo saareen in lagu dhaqmo iyo in miisaska iska dul yaalaan. taas ayaan soo jeedin lahaa, run ahaantii wax badan ayaa inooga soo bixi doona waanan idin salamaayaa.

**Md. Maxamuud Jaamac Cilmi (Dable):-** shir gudoonka iyo Mudanayaashaba waad salaamantihiin, sharciga sidiisaba golaha ka baxaya waxaa wanaagsan in sharci yaqaanka golaha loo dhiibo, si uu wixii khalada ee kujira ilayn nin walba takhasus ayuu leeyahay aduunkee loo dhiibo oo uu isku eego xeerarkii hore ee baxay in aanay ka hor imanayn iyo qaladaadka ku jira in uu ka sifeeyo sida aan mar horana sheegay, waayo may dhacdeen hadii loo dhiibi lahaa sharci yaqaanka golaha xeerarkaa is jiidhayaa, markaa waxaan hoosta ka xariiqayaa in sharciga soo baxa loo dhiibo loyer-ka si uu eego in wixii baxay iyo waxan socdaa aanay iskaga hor imaan oo uu uga saaro.

Arinta kale ee jirta waxay tahay dadka ayaynu wakiil ka nahay hadana ajandahan waxba kagama jiraan hadii ay noqon lahayd Maciishada, Dhakhaatiirta waxaana waajib ah in laga hadlo, waxaana la marayaa duruufo adeg oo Roona jirin adhina jirin waxna jirin oo duruufta umada aan ka hadalno.

Sidoo kale waxaa jira in dadka la xidh xidhayo sida; ka xabada muuska ah xada waa la xidhayaa nina maalaayiin haduu xado cidnina xidhimayso oo kaa miskiinka ah ee xabada muus ah xaday koob-shaaha oo uu xabsiga ku cabo ma haysto markaa waa in gudidda ku shaqada lihi ay soo kormeerto oo warbixin ay ka keenaan dadkaa xaqdarada ku xidhan oo go'aan gole la soo saaro si maxkamadu degdeg u sii dayso ama ay wakhti u qabato.

Mida sadexaad Somaliland duruufo siyaasadeed ayaa ku gadaaman waxay ahayd in ajandaha lagu soo daro, waayo arimihii aan lahayn ayaa waxa ka hadlaya muqdisho waana in aan ka hadalnaa oo aan taageerno wixii horumar ah ee wadanka ka socda, waxna u soo kordhinaya ee sharciga iyo nidaamka ku fadhiya oo ay ka mid tahay Horumarinta dakadaha oo aynu halka ku soo darno in aan ayidayno in aanay Xamar-na shaqo inagu lahayn bayaana ka soo saarno, waxaana wanaagsan in aan mowqif cad iska taagno oo aynaan sugin Farmaajo, Khayre iyo Baarlamaanka Somalia toona.

**Waxaan soo jeedinayaa: -**

- In aan maanta go'aan Gaadhno ama bayaan aynu ku cadayno in ay dawladeena u xor u tahay hashiisyadeeda.

**Md. Axamed Maxamuud Caateeye (awoowe):-** shirgudoonka iyo xildhibaana golaha wakiiladaaba salaanta islaamka ayaan ku salaamayaa, waxanan ahay xildhibaan ku cusub golaha Magacaygana waxaa la yidhaa Axmed Maxamuud Caateeye in kastoo aanan ku cusbayn magaalada, kani waa xilkii iigu horeeyay ee aan qabto.

Hadii aan u soo daadago mawduucan laga hadlay, markii hore waxaa ka tirsanaan jiray wasaarada Cadaalada oo aan agaasime ka ahaa, run ahaantiina xeerarka waxaa loo kala qaadaa sida ay u kala mihiimsanyihiin, markaa waxaa jira xeer qabyo qoraal ah oo ka hadlaya tahriibka iyo ka ganacsiga dadka waanad ogtihiin xaalada dalku marayaa oo dhalinteenii in ay badaha ku dhamaatay oo magafayaal kala iibsadaan wax xeer ah oo lagu dhaqaana aanay jirin, markaa waxaan soo jeedinayaa in xeerkaa lagu soo daro ajandaha, waanad mahadsantihiin.

**Md. Ibraahim Axmed Regal: -** shir-gudoonka iyo xildhibaanaduba way salaamanyihiin, inta aanan ajandaha ugalin waxaan doonayaa in aan taageero sidii ay xildhibaanadii iga horeeyay ay sheegeen oo aan ku raacsanahay oo ah in duuruufta uu dalku marayo aynu bayaan ka soo saarno Gole ahaan.

Labo in dhaqaalaha dalka uu lumay xoolihiina ay dhamaadeen sidii loo sheegay, badiina lagama shaqaysto markaa waa in Strategy-yada dhaqaale waa in ay inaga muuqataa oo Goleyaasha iyo dawladuba isla jaan qaadaan oo aynu qaranka sidaa ugu hiilino.

Waxaan u soo gudbayaa ajandaha oo ah Ajande wanaagsan, laakiin laba arimood. Waa mide wuu faro badanyahay oo sidii markii horaba dhici jirta in aan laga wada gaadhsiin baa dhici karta markaa waa in la soo koobaa oo qodobka koowaad laga dhigaa Fayo dhawrka, maaraynta Qashinka, qodobkan oo sidii xildhibaanadii iga horeeyay ay ka hadleen oo aad muhiim ah, waxaan ku xigsiinayaa Xeerka Qandaraasyada qaranka, miisaaniyada dalku marka ay timaado iyadu waa iska caadiye'

Waxaa kale oo aan u gudbayaa xeerka doorashooyinka golaha wakiilada halka lagu qoray xeerka doorashada goluhu wuu jiree, laakiin wax ka bedel iyo kaabis waa in lagu qoraa oo sidan uu qoran yahay laga bedelaa, waxaa kale oo aan intaa ku xigsiinayaa hadii aynu ka gaadhsiino xeerka xawaalada waxaa kale oo aynu mar walba u horaysiinaynaa wixii marwalba gole weynahay horyaala oo uu ka mid yahay xeerka maydhista lacagta oo aynu ku quruurixinayno sii daayo diid ama siidaa weeyi oo gole waynaha ayuu horyaalaa.

Waxaan u gudbayaa arinta ku saabsan qodobka 5aad ee ugu danbeeya odhanayana wixii soo kordha; taas oo muhiimad weyn aniga ii samaynaysaa oo waxaan ku soo darayaa ama goluhu gudidda shuruucda ha u saaro ama gudi kale ama mooshin ha lagu keenee arin disaster ah oo dalka taala waana arinta tahriibka. "waxaa dhacay gabadh ayaa waxay xaday ilmo yar oo meelahaa sanaag iyo ay la tagtay oo ay hooyadeed daba wareeyagsay markii la soo helay ilmihii waxba laguma xukumin, hadana mid kale ayay xaday inta la qabtay ayaa 2 sano iyo badh ayaa lagu xukumay" waa la yaabay oo xeer ilaalayaashii waxay yidhaahdeen wax aan ku xukuno mahayno, waxaanan rabaa in arinkaa la igu taageero wasaalaamu calaykum.

**Md. Axmed Maxamed Diiriye (Nac-nac): -**shirgudoonka iyo baarlamaanka, iyo saxaafadaba waan salaamayaa salaamayaa mid waan ku ayid sanaha xildhibaankii iga horeeyay ee ahaa waa in aan go'aan gale ka so saarnaa DP-world iyo arimahaa Somaliya inaga fara-faraynayso arimaheena iyada oo aan shaqo ku lahayn oo anay awood ulahayn in joojiyaan in aynu aduunyada tusno taa waan soo jeedinayaa.

Waxaa kale oo Iyana jirta Aagaa Sayla in ciid iyo dhagax laga guro lana geeyo Jabuuti oo wadankan ilaa ciidii la guranayo waa in aan wax ka soo saarnaa in waxyaabahaa si qaranka mamnuuc yihiin taana waan soo jeedinayaa waana in baadhitaan loo diraa arinkaa waxna ka qabanaa, wabilaahi tawlfiiq.

**Gudoomiye Baashe: -** dooda sidaa ayay inoogu dhamaatay waana in la isku soo hagaajiyaa, waxaanan kala saaraynaa wixii gudeheena ah iyo wixii dibada ah waxaanan qoraynaa resolution kii waxaanan keenaynaa maalinta barri ah, waanad ogtihiin Baarlamaankii Somaaliya ayaa Fadhiya waxa laga hadlayaana mooshin ay keeneen oo ka hadlaya Dekada Berbera waanan ka jawaabaynaa. Waxaanan dadweynaha iyo international community-ga u sheegaynaa in aan gali karno heshiiska aan doono cidna kala tashan mayno horena wuu u ansixiyay heshiiskaa goluhu barri ayaanan ka jawaabaynaa golahana waxaan farayaa in ay ka soo qayb galaan si aan cadawga ugu jawaabno fadhigu wuu xidhan yahay.

| | |
|---|---|
| **Cawad Cali Maxamed** | **Cabdirisaaq Siciid Ayaanle** |
| **Agaasimaha Waaxda Hadal-qoraalka iyo Gudiyada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada** |
| ________________________________ | ________________________________ |